# XAASHIDO XAQIIQDA # 2
# HORUDHAC SABOOLNIMADA MIDAB-KALA-SOOCA

## Sideen u cabirnaa saboolnimada?

kanada waxay inta badan isticmaashaa dakhli-goyn(DG) silo capiro dhibaatada dhaqaale xumada waxayna dhowaan bilaabi doontaa adeegsiga hab cabirka dhaqaale xumada (CDHX).

Taas oo inta badan loo adeegsado isbarbar dhigyada caalamiga ah. (DG)wuxuu muujinayaa inta qoysas ah ee u isticmaalaya wax ka badan boqolkiiba celcelis ahaan dakhligooda dhinaca baahida cuntada.hoyga iyo dharka.cabirka dakhliga hooseeya (CDH) waxay muujineysaa imisa qoys ayaa daqliga soo galaa ka yar yahay kalabar dakhliga qaran ee dhexdhexaadka ah ee qoyska qiyaas ahaan la mid ah.

in si buuxda loo fahmo ama loo cabiro saameynta midab kala sooca, isir-nacaybka waa inuu kujiraa asal ahaan ama aqoonsi isir, jinsi, naafo da'da, hanuuninta galmada, xaalada socdaalka iyo nooca qoyska iyo sidoo kale gobolka.

## Yaan ka hadleynaa?

Macluumaadka ku jira xaashiyahan xaqiiqada ah waxaa loola jeedaa dadka reer Kanada ee asal ahaan amaba dhaxal ahaan aan ahayn reer Yurub iyo dadka midabka leh ee u dhashay Kanada iyo waliba kuwa ku dhashay meelo kale oo Kanada ka mid ah. xaashiyahan xaqiiqda ahi Waxay tixraac siman u samaynayaan dadka asaliga ah, kuwaas oo leh taariikh iyo khibrad kala duwan.

Fahamkeenna dadka asaliga ah waxaan ka tix raacnaa qeexitaanka inta badan la aqbalo ee lagu qeexay sharciga dastuurka, 1982, in dadka asaliga ahi ay yihiin kuwa isu aqoonsadaan quruumihii ugu horreeyay( xaalad iyo xaalad laaanba), Metis iyo Inuit. Waxaan aqoonsan nahay sheegashada dadka asaliga ah dhanka caddaaladda, sheegashada kuwa ku nool dib-u-dejinta, waa kala duwan yihiin waxayna u baahan yihiin istiraatiijiyado gaar ah iyo wax u qabasho ummad ilaa ummad ah iyo in dadka asaliga ah ay ka mid yihiin kuwa ay sida ugu xun u saameeyeen saboolnimada hay'ado la,aanta,qaab dhismeed la,aan,nidaamka cunsurinimada iyo gooni usaarida.

## Midabaynta Saboolnimada:

Midabaynta waxaa loola jeedaa "hannaanka ay bulshooyinka dhaqanku u dhisayaan jinsiyadaha mid dhab ah oo kala duwan oo aan u sinayn siyaabaha muhiim u ah dhaqaalaha, siyaasadda iyo nolosha bulshada. Noocyada isirku kuma saabsana sayniska ama cilmiga bayoolajiga laakiin waxay ku kala duwan yihiin kala duwanaanshaha ay bulshada u dooratay inay ku nuuxnuuxsato, oo cawaaqib xumo u leh nolosha dadka.

dadka waxaa lagu kala sooci karaa kuma saleysana midabka maqaarka oo kaliya, laakiin sidoo kale astaamaha kale ee lagu dabagalo waxaa kamid ah dhaqanka, caadooyinka, luqada, dalka ama meesha ay ka soo jeedaan, ama xiriir dhow oo ay la yeeshaan eexda caqiidooyinka sida islamaphobia iyo caqiidada anti- sikh.

Bulshooyinka isir raaca waxay la kulmaan heerar kala duwan oo saboolnimo ah
Si kale haddii loo dhigo, dadka midabka leh ama kuwa asaliga ahba waxay u badan tahay inay hoos ugu dhacaan DG/ CDHX iyo dhibaatooyin la xidhiidha caafimaad xumo, waxbarasho hoose iyo fursado shaqo oo aad u yar, marka loo eego dadka aan isir raaca ahayn.

In kasta oo ay suurtogal tahay qofkasta inuu la kulmo dakhli hooseeya iyo fursado yaraan, shaqsiyaad iyo nidaamka midab kala sooca ayaa door weyn ka ciyaara abuurista xaalado aan fiicnayn iyo carqalado loogu talagalay dadka midabka leh iyo dadka asaliga ah.

takoorida macnaheedu waa yar tahay inay helaan shaqooyin u qalma heerkoda aqoonta isla markaana waxay u badan tahay inay ka dakhli ka yaraadaan kuwa ay isku heerka yihiin. Iyo sidoo kale inay ku noolaadaan kuna shaqeeyaan xaalado liita, helitaan daryeel caafimaad oo yar, iyo inay dhibbane u noqdaan rabshadaha booliiska.

## Cunsuriyada nidaamsan iyo saboolnimada la takooray ayaa ah arrimo muhiim ah oo waxlaga qabanaya.

**Cunsuriyadda waa mid dhab ah. Taariikhda addoonsiga, gumaysiga iyo hay'adihii ina soo maray waxay sii wadaan qaabeynta xilligan iyo abuurida farqiga kale ee u dhexeeya dadka midab-kala ah, dadka asaliga ah iyo kuwa kale.tani waa mid aan la aqbali Karin.**

Hab wanaagsan oo looga gudbi karo qorshaha istiraatijiyadeed
ee cunsuriyadda 3 sano ee soo socota Ontario

### Waa maxay cunsuriyad Nidaamsani?

midab-kala-sooca nidaamsani waxay dhacdaa markii hay'ad ama hay'ado isla shaqeeyaa ay abuuraan sinaan la'aan iyo midab-kala sooc. tani waxay noqon kartaa mid aan ula kac ahayn, taas macnaheedu maahan in dadka ka tirsan ururku ay yihiin cunsuriyiin. waxaa badanaa sababa hay'ad qarsanaya siyaasadaha eexda, Ku dhaqmida hawlahan waxay si gaar ah faaido darro ugu keentaa kooxo ama dad kala duwan. Waxay noqonkartaa natiijada ka dhalata samaynta waxyaabo sidii ay ahaayen aan loo tixgelin waxayna saameyn toos ah oo kala duwan ku yeeshaan kooxo.

Cunsuriyadda nidaamsan ayaa u horseedi karta dadyowga asaliga ah, dadka madowga ah iyo dadka kale ee midabka lehba metelaada dhinaca xabsiyadayada iyo nidaamka daryeelka carruurta. Waxay u horseedi kartaa dhalinyarada asaliga ah inay wajahaan caqabado dhaqaale oo aan cadaalad ahayn iyo awood helitaan caafimaadTaasi Waxay kuu macnayn kartaa sababta islamophobia iyo dabeecadaha madowga ka soo horjeeda wali usii jiraan.

Qirashada cunsuriyadda nidaamsan iyo fahamka waxay ay tahay iyo sida ay u egtahay waa tillaabada ugu horeysa ee u doodista cadaalad wax ku oolka ah. Waxaa muhiim ah in la xuso in sameynta arinkaasi aysan qarineyn qibradda shaqsiyadeed iyo dhibaatooyinka shakhsiyaadka ee ah in aan lagu bar tilmaamin cunsuriyadda nidaamsan.

Qirashada cunsuriyadda nidaamsan waxay inoo ogolaaneysaa in aan ka garowno sida ay dadka qaarkii mudnaan u leeyihiin ama ay wax u qiyaaneeyaan. sidaa darteed sida wax looga qaban karo arinka eexda iyo carqaladaha waa in la helo sinaan iyo cadaalad.

Sanadkii 2016 saamiga dadka midabka ah (tirakoobka canada wuxuu adeegsaday 'dadka laga tirada badan yahay) wuxuu noqday canada 22% Ontariyana saamiguna wuxuu noqday 29% (3,8885,585 qofood).

**Dadka isir raaca ah ee kunool Canada waxay u badantahay inay ku nool yihiin saboolnimo. Tirakoobkii 2016-kii wuxuu muujiyey in 20.8% dadka midabka leh ay dakhligoodu hooseeyo marka la barbardhigo 12.2% dadka aan isirka ahay.**

Sanadkii 2015 farqiga u dhaxeeya dakhliga deegaanada isir raaca ah iyo kuwa isirka ah wuxuu kordhay 25% ilaa 26%.

**Marka loo eego xogta cansus ee 2016, 80% dadka asaliga ah ee ku nool deegaanka kaydka canada waxay ku nool yihiin faqri. 27 beelood ayaa soo sheegay isku celceliska dakhligooda dhaxdhax**
**aadka ahi in uu ka hooseeyo $10.000.**

41% muhaajiriinta haysata shahaadooyinka waxbara ayaa ku nool 5 sano oo isku xigta xaalad nololeed liidata oo ka hooseysa dakhli goynta. (DG).